

TALO!
Geli Xusuus
telefoonka
gacanta.

# Jadwalkayga caadada dhiigga

Ma doonaysaa inaad faahfaahin dheeraad ah ka hesho kiniinigaaga kahortagga uuraysiga? Eeg warqadda baakadda ama booqo www.fimea.fi

Haddaad Drovelis® ka qabto su'aalo kale oo dheeraad ah, waxaad had iyo jeer la xiriiri kartaa ummulisadaada ama takhtarkaaga. Waxaan iyana kugu soo dhaweyneynaa inaad nagala soo xiriirto tel: 08-506 394 76 ama e-mail: medinfo.se@gedeonrichter.eu

GEDEON RICHTER

Barnhusgatan 22, 111 23 Stockholm. Tel: +46 8 611 24 00

GEDR_70761 | DRO-apr23-FI- 23136:1



drovelis

3 mg drospirenon iyo 14,2 mg estetrol
(sida estetrol monohaydarayt)
Kiniini kahortag uuraysi oo iskudhafan
oo leh nidaam daawayn 24/4

# Macluumaad muhiim ah oo ku saabsan Drovelis®

WAXAAD BUUG-YARAHAAN KA HESHAY UMMULISADAADA AMA TAKHTARKII KUU QORAY DROVELIS®.

DENNA SKA EJ TAS MED I TRYCKFILEN, BARA I KORR-PDF.
I TRYCK-PDF SKA SID 5-28 SPARAS FÖR INLAGAN (24 SIDOR.)

# DROVELIS® - KAHORTAG UURAYSI AAN LA DOONAYN OO AAMMIN AH

Kiniiniyada kahortagga uuraysiga waa mid ka mid ah hababka aamminka ah oo la isaga ilaaliyo uuraysiga aan la doonaynin, hase ahaatee waxaa muhiim ah in si sax ah loo isticmaalo. Buug-yarahaan waxaad ka ogaanaysaa faahfaahin dheeraad ah oo ku saabsan kiniinigaaga cusub ee kahortagga uuraysiga iyo sida ay tahay inaad u isticmaasho.

Waxyaalaha kala duwan ee uuraysiga looga hortago waa u kala habboon yihiin dumarka kala duwan. Drovelis® waa kiniini kahortag isku dhafan oo ka kooban qiyaas yar oo estetrol ah (nooc hormoon esterojiin ah) iyo drospirenon (nooc hormoon borojesteroon ah).

Haddaadan u arkin inuu Drovelis® kugu habboon yahay, wax kale oo la doorto ayaa jira. La hadal ummulisadaada ama takhtarkaaga haddaad su'aalo ah qabto.

GEDEON RICHTER

# TUSMO


| | |
|---|---|
| Intaadan Drovelis® billaabin | 5 |
| Sidan ayaad qaadashada ku billaabaysaa | 6 |
| Sidan ayuu u shaqeeyaa Drovelis® | 9 |
| Muhiim in laga fakero | 10 |
| Su'aalo iyo jawaabo | 12 |
| Meertadaada caado | 20 |
| Jadwalka dhiigga caadada | 28 |

# WAXYAALAHA AY TAHAY IN LAGA FAKERO INTAADAN DROVELIS® BILLAABIN



1. Lama oggola inaad Drovelis® bilowdo haddaad uur leedahay. Hadduu shaki jiro waa inaad samaysaa tijaabo uur ama la hadashaa ummulisadaada ama takhtarkaaga.

2. Waa inaad ummulisadaada ama takhtarkaaga u sheegtaa haddii:

   - *Aad qabtay ama qabi jirtay cudur beerka ama kelliyaha ah, dhiig xinjirow (ama qof qaraabo dhow ah uu dhiig xinjirow qabay), kansarka naasaha ama xubnaha taranka, dhiigkar, sonkorow, dhiig hoostaada ka yimaada oo aan sababtiisa la garanayn ama madax-xanuun goonjab ah oo ay wehliyaan carqalado xagga aragga ah.*
   - *Aad sigaar cabto, da'daaduna ay ka sarreyso 35 jir.*
   - *Aad saa'id u nugushahay ama aad wax gaar ah ka xasaasiyooto.*
   - *Aad isticmaasho daawo dabiici ah ama daawooyin kale.*

3. Faahfaahin dheeraad ah waxay ku taal warqadda baakadda. Si fiiro dheer leh u akhri.

# SIDAN AYAAD DROVELIS® KU BILLAABAYSAA

Sidaad ku billaabayso qaadashada kiniini cusub ee kahortag uureysi waxay ku xiran tahay inaad haddadan isticmaasho hab kale oo hormoon ku dhisan oo kahortag ah ama haddii kale oo aysan taas ahayn waxaad samaysay bishii ugu dambeysay. Haddaad raacdo talooyinka hoos ku xusan waxaad heleysaa difaac wanaagsan aad uuraysiga uga hortagto xitaa haddaad u kala gudbeyso laba hab kahortag uureysi.



**Haddaadan bishii la soo dhaafay isticmaalin wax maaddo hormoon leh ee kahortag uureysi, sidan samee:**

1. *Qaado kiniinigaaga ugu horreeya maalinta ugu horreysa ee caadadaada.*
2. *Dabadeed maalintiiba mid qaado. Raac fallaaraha kaarkaaga. Maadaama nuxurka kaniiniyadu uu kala duwan yahay, waa inaad ka bilowdaa kiniiniga casaanka ah (kiniiniga ugu horreya xagga ugu sarreysa ee bidixda xigta). Cun dabadeed dhammaan 24-ka kiniini ee casaanka ah. Markay kuwa casaanka ahi dhammaadaan waxaad cunaysaa 4-ta kinin ee caddaanka ah (kiniini-sonkoreed) afarta maalmood ee ugu dambeeya meertada 28-maalmoodka ah.*
3. *Qaado kiniinigaaga maalin kasta saacad isku mid ah, tusaale ahaan xilliga quraacda ama markaad cadayanayso.*
4. *Marka uu hal kaar dhammaado, hab la mid ah ayaad ku wadaysaa kaar cusub. Micnihii wax joojin ah ma samaynaysid. Dooro maalinta la joogo ee toddobaadka.*
5. *Waxaa dhici karta inuu kugu dhaco dhiigbax caadada u eg markaad qaadanayso kiniiniyadaada cadcad ee hormoom la'aanta ah. Haddaad bilowdo qaadashada Drovelis® maalinta ugu horreysa ee caadadaada, markiiba waxaad heleysaa difaac kahortag uuraysi. Waxaad iyana qaadashada billaabi kartaa maalinta 2-5 ee meertada caadada. Hase ahaatee markaas waa inaad isicmaashaa kahortag kale oo dheeraad ah (tusaale ahaan cinjir galmo) 7-da maalmood ee ugu horreeya.*

## HADDAAD KA SOO BADDELANEYSO KINIINI, GIRAAN AMA BALAASTAR KAHORTAG, SIDAN AYAAD SAMAYNAYSAA:

- *Sii wad qaadashada kiiniinigaaga aad hadda qaadato ilaa kaarka hadda furan uu ka dhammaanayo.*
- *Haddaad isicmaalayso kiniini kahortag ka kooban 21 kiniiniyo kaarkiiba, waxaad qaadashada billaabaysaa markiiba markaad qaadato kiniiniga ugu dambeeya kaarka.*
- *Haddaad isticmaalaysay kaar ka kooban 28 kiniini, waxaad qaadshada billaabaysaa kiniiniga hormoon la'aanta (kiniini-sonkoreedka) ee ugu dambeeya ka dib.*
- *Haddaad isticmaalaysay giraanka kahortagga ama balaastarka kahortagga, bilow Drovelis® ugu dambayn isla maalinta aad qaadan lahayd balaastar cusub ama giraan cusub.*



## HADDAAD KA SOO BADDELANEYSO KINIINI-YARE, CIRBAD KAHORTAG, UL KAHORTAG AMA GARIIRAD HORMOON, SIDAN AYAAD SAMAYNAYSAA:


- *Kiniini-yaraha: ka soo baddelo maalinta aad dooneyso.*
- *Usha kahortagga ama gariiradda hormoonka: bilow Drovelis® isla maalinta lagaa bixinayo walaxdaadii hore ee kahortag.*
- *Cirbadda kahortagga: ka soo baddelo wakhtiga cirbadda xigta lagugu duri lahaa.*
- *Markaad ka soo baddelaneyso afartaan hab waa inaad isticmaashaa kahortag kale oo dheeraad ah (tusaale ahaan cinjirka galmada) 7-da maalmood ee ugu horreeya.*

**Drovelis®** waa kiniini kahortag isku dhafan oo ka kooban qiyaas yar oo estetrol ah, waa hormoon esterojiin oo si dabiici ah loo helo, iyo drospirenon, waa hormoonka cadka woobka ah oo u eg borojesteroonka caadiga ah ee jirka. Hormoonnadu waxay u shaqeeyaan hab u eg habka hormoonnada jinsiga ee uu jirku sameeyo, esterojiin iyo borojesteroon.

# MUHIIM IN LAGA FAKERO

- *Markaad booqanayso ummuliso ama takhtar, had iyo jeer u sheeg inaad isticmaasho Drovelis®.*
- *Ku dar isticmaalka cinjirka galmada haddaad lammaane cusub yeelato. Drovelis® kaama difaacayo cudurrada lagu kala qaado galmada sida herbes, kalamiidhiya, kondilooma ama hiv.*
- *Drovelis® waa dawo – ku hay had iyo jeer meel aysan carruurtu gaarin.*
- *Weligaa qof kale ha siinin kiniinigaaga Drovelis®.*





# SU'AALO IYO JAWAABO KU SAABSAN DROVELIS®

Bogagga soo socda, waxaad jawaabo u heli doontaa su'aalaha soo noqnoqda ee ku saabsan Drovelis®. La hadal ummulisadaada ama takhtarkaaga haddaad doonayso inaad faahfaahin dheeraad ah hesho, qabto su'aalo ama aadan ku qanacsanayn kiniinigaaga kahortagga uuraysiga.

**Miyuu Drovelis® qof kasta anfacaa?**

*Waa muhiim inaad ku qanacsan tahay oo aad dareen wanaagsan ku qabto kaniinigaaga ka hortagga uuraysiga. Si la mid ah waxyaalaha kale ee uuraysiga looga hortago wuxuu Drovelis® keeni karaa saamaynno, sida findoob, madax-xanuun, lallabbo, caado-wareer, dabci-isbedbeddel iyo naaso-danqasho. Saamaynnada qaarkood waxay tagi karaan muddo ka dib, dadka qaarkoodna wax saamayn ahba ma yeeshaan.*

**Miyuu Drovelis® miisaan-koror keenaa?**

*Waxa daraasado lagu ogaaday inaysan dumarku guud ahaan miisaan-koror ka qaadin kiniiniyada ka hortagga uuraysiga, hase ahaatee dumar hal hal ah miisaankoodu wuu kori karaa. Way dhacdaa iyana inuu miisaanku hoos ugu dhaco isticmaalka Drovelis® dartiis.*

**Dib ma u dhigi karaa xilliga caadadayda?**

*Haddaad doonayso inaad xilliga caadada dib u dhigto, waxaad taas samayn kartaa adigoo keliya qaata kiniiniyadaada casaanka ah (ma aha 4-ta ugu dambeeya ee cadcad ee kinini-sonkoreedyada ah). Tuur dabadeed kaarka kiniiniyada oo markiiba bilow mid cusub. Waxaa laga yaabaa inuu kaa yimaado dhiig yar ama dhiig caado u eke ah, markaad kaarka labaad isticmaalayso. La tasho ummulisadaada ama takhtarkaaga haddaadan hubin sida la doonayo inaad samayso.*

## Ma igu dhici kartaa caado aan joogto ahayn?

*Markaad Drovelis® bilowdo waxaa kugu dhici kara dhiigbaxyo yaryar oo lamafilaan ah (dhiigbaxyo ka baxsan xilliyada 4-ta maalmood ee kiniini-sonkoreedyada cadcad). Dhowr bilood ka dib, dhiigbaxyada noocan oo kale ahi caadi ahaan way joogsadaaan. Sii wad qaadashada kaniiniyadaada kahortagga uuraysiga muddada loogu talagalay oo dhan.*

## Wax dhiig ah igama imaan xilligii hormoon la'aanta ahaa. Ma laga yaabaa inaan uur qaaday?

*Haddaad ilowday inaad kiniinigaaga qaadato xilligii laguugu talagalay ama haddii dhiiggii la filayay laba goor oo isku xigta la waayo, waa laga yaabaa inaad uur qaadday. Waa inaad markaas tijaabo uur samaysaa. Waxaad keliya ku billaabi kartaa kaarka xiga ee kaniiniga haddaad hubto inaadan uur lahayn. La xiriir ummulisadaada ama takhtarkaaga haddaad wax su'aal ah qabto. Eeg iyana waxyaalaha hoos ku xusan.*

**MUHIIM!**

Ma tihid qof difaacan haddii 24 saacadood ka badan laga joogo xilligii ay ahayd inaad kiniinigaaga Drovelis® qaadato. **Sidaas darted kiniiniga iyo cinjir galmo isku qaado 7-da maalmood ee soo socda.** Waxaa laga yaabaa inaad uur yeelatay haddaad seegtay qaadashada Drovelis® toddobaadka daawada ee ugu horreeya oo aad galmo samaysay toddobaadkii ka horreeyay. La xiriir ummulisadaada ama takktar si aad ula tashato.



## Sideen sameeyaa haddaan illoobay inaan kiniinigeyga qaato?

*Qaado kiniinigaaga sida ugu dhakhsaha badan haddaad ilowday inaad qaadato. Kadib waxaad kaniiniga xiga qaadanaysaa xilliga caadiga ah. Micnihii waxaa laga yaabaa inaad laba kiniini isku maalin qaadato. Haddii in ka badan 24 saacadood laga joogo xilligii ay ahayd inaad kiniinigaaga qaadato waa inaad kiniiniga cinjir galmo ku dartaa 7-da maalmood ee soo socda**

** Wixii faahfaahin ah oo ku saabsan ilowshaha qaadshada kiniiniga ka eeg warqadda baakadda.*

## Miyuu difaaca Drovelis® xumaan karaa haddaan mantago ama shubmo?

*Haa, sidaas darteed ku dar cinjir galmo muddo 7 maalmood ah marka laga bilaabo xilligii aad mantagtay ama shubantay oo sida caadiga ah u sii wad qaadashada kiniinigaaga ka hortagga uuraysiga.*

## Daawooyin kale ma qaadan karaa markaan Drovelis® qaadanayo?

*U sheeg ummulisadaada ama takhtarkaaga inay daawo kale kugu socoto, xitaa hadday tahay daawo dhigaal la'aan ah ama mid dabiici ah. Daawooyinka qaarkood waxay xumayn karaaan kahortagga uuraysiga ama waxay sababi karaan dhiig-baxyo lamafilaan ah.*



*Waxaa ka mid ah oo ay tanu khusaysaa daawooyin loo isticmaalo daaweynta cudurrada qallalka, qaaxada, hiv ama qallajiyeyaal infekshannada kale lagu daaweeyo, dhiigkarka iyo daawooyinka dabiiciga ah ee leh dhirta Hypericum (St John's wort). Drovelis® wuxuu saamayn karaa waxtarka daawooyinka kale, tusaale ahaan:*

- *Daawooyinka leh walaxda ciklosporin.*
- *Daawada qallalka ee lamotrigin (taasoo horseedi kartaa kororka tirada qallal-qabadka).*

## Markaan joojiyo qaadashada Drovelis® markiiba miyaan uur qaadi karaa?

*Haa, waxaad uur qaadi kartaa isla bisha ugu horreysa markaad joojiso Drovelis® ka dib.*

## Miyaan Drovelis® markiiba billaabi karaa markaan qaatay kaniiniga uurdhicinta degdegga ah ka dib?

***ellaOne®** waa in la qaato 120 saacadood (5 cisho) galmo difaac la'aan ah ka dib ama marka mid ka mid ah hababka kahortagga uurka lagu guuldarraysto.*

*Haddaad qaadatay ellaOne® waa inaad sugtaa 5 cisho intaadan billaabin kiniini kahortag uuraysi ama hab kale oo hormoon ah ka hor, waayo walxahaasi kahortaggu waxay yarayn karaan waxtarka ellaOne®.*

*Waa inaad isticmaasho cinjirka galmada ama hab kale oo xannibadeed 2 toddobaad ka dib markaad qaadatay kiniinigaaga uurdhicinta degdegga ah ee ellaOne®.*

***NorLevo/Postinor®*** *waa in la isticmaalo 72 saacadood (3 cisho) galmo difaac la'aan ah ka dib, ama marka lagu guuldarraysto mid ka mid ah walxaha ka hortagga uuraysiga.*

*Haddaad qaadatay NorLevo/Postinor® waxaad markiiba ku xijin kartaa ama billaabi kartaa kaniini kahortag uuraysi ama hab kale oo hormoon.*

*Waa inaad isticmaasho cinjirka galmada ama hab kale oo xannibadeed 1 toddobaad ka dib markaad qaadatay kiniinigaaga uurdhicinta degdegga ah ee NorLevo/Postinor®.*

*Si aad u hesho warbixin dheeraad ah gal bogga www.fass.se*

**MUHIIM!** *Had iyo jeer u sheeg ummulisadaada ama takhtarkaaga inaad Drovelis® isticmaasho!*



## Uur, ilmo-soo-ridid ama ilmo-dhicin ka dib goormaaan Drovelis® billaabi karaa?

*Raac talooyinka ummulisadaada ama takhtarkaagakaaga.*


## Waa goorma markay tahay inaan markiiba daryeel raadsado?

- *Haddaad isku aragto astaamo xinjirow dhiig. Calaamaduhu waxay noqon karaan: xanuun daran, lugo-barar, laab-xanuun aan la fasiri karin, xuurto ama qufac aan caadi ahayn. Liis buuxa waxaa laga akhrisan karaa warqadda baakadda.*
- *Haddaad si lamafilaan ah aad isku aragto xanuun daran oo kaa qabta qaybta hoose ee caloosha, buro naaska gudihiisa ah, qalliin ka hor, dhiig badan oo xoog leh oo ka yimaada hoostaada, cuncun daran, madax-wareer ama aad ka shakisan tahay inaad uur leedahay.*

*Haddaad heli weydo ummulisadaada ama takhtarkaaga waxaad had iyo jeer si toos ah ula xiriiri kartaa daryeel caafimaad kale.*

# MEERTADAADA CAADO

Caadadaada ma heshaa wakhti isku mid ah bil kasta mise waa mid ku timaadda xilli aan sidaas joogto u ahayn? Wakhtiga ay caadadu billaabato dumarku way ku kala duwanaan karaan. Meerto caado waxaa la xisaabiyaa laga billaabo maalinta ugu horreysa ay caadadu kugu dhacdo ilaa maalinta ugu horreysa ee caadada xigta, waxayna celcelis ahaan socotaa 28 maalmood.






# WAXYAALAHAAN AYAA DHACA INTA LAGU JIRO MEERTADA CAADADA

1. *Billowga meertada caadada waxay maskaxdu baaqyo u dirtaa ugxansideyaalka – sidaas ayuu goon-ugxaneed ku billaaba inuu bislaado.*
2. *Esterojiinka uu soo saaro goon-ugxaneedka soo koraya ayaa sababa in xuub-axaleedka ilmogaleenkaagu uu kobco.*
3. *Goon-ugxaneedka ayaa 14 maalmood caadada ka hor dillaacaya, ugaxduna sidaas ayay ku soo baxaysaa.*
4. *Ugaxda waxaa qabanaya dhuunta faloob, ilmogaleenka ayayna hoos ugu soo daadegeysaa.*
5. *Goon-ugxaneedka soo go'ay wuxuu sameeya hormoonka borojesteroonka. Xuub-axaleedka ilmogaleenka wuxuu imminka isku diyaarinayaa inuu hal ugax qaabilo.*
6. *Haddaan ugaxda la bacrimin waxaa yaraanaya soo saarka esterojiinka iyo borojesteroonka.*
7. *Maalinta 28-aad xuub-axaleedka ilmogaleenka ayaa soo go'a oo dhiigga caadada soo raaca.*

## KAARKAAGA DROVELIS®

- *Baakadda Drovelis® waxaa ku jira 3 kaar.*
- *Kaar kasta wuxuu leeyahay 24 kiniini hormoon leh oo casaan ah iyo 4 kiniini aan hormoon lahayn oo caddaan ah (kiniini sonkoreed).*



# Ma doonaysaa inaad faahfaahin dheeraad ah ka hesho kiniinigaaga kahortagga uuraysiga?

Eeg warqadda baakadda ku jirta
ama booqo bogga www.fimea.fi

# drovelis

3 mg drospirenon iyo 14,2 mg estetrol
(sida estetrol monohaydarayt)
Kiniini kahortag uuraysi oo iskudhafan
oo leh nidaam daawayn 24/4

# DROVELIS® - KAHORTAG UURAYSI AAN LA DOONAYN OO AAMMIN AH

Kiniiniyada kahortagga uuraysiga waa mid ka mid ah hababka aamminka ah oo la isaga ilaaliyo uuraysiga aan la doonaynin, hase ahaatee waxaa muhiim ah in si sax ah loo isticmaalo. Buug-yarahaan waxaad ka ogaanaysaa faahfaahin dheeraad ah oo ku saabsan kiniinigaaga cusub ee kahortagga uuraysiga iyo sida ay tahay inaad u isticmaasho.

Waxyaalaha kala duwan ee uuraysiga looga hortago waa u kala habboon yihiin dumarka kala duwan. Drovelis® waa kiniini kahortag isku dhafan oo ka kooban qiyaas yar oo estetrol ah (nooc hormoon esterojiin ah) iyo drospirenon (nooc hormoon borojesteroon ah).

Haddaadan u arkin inuu Drovelis® kugu habboon yahay, wax kale oo la doorto ayaa jira. La hadal ummulisadaada ama takhtarkaaga haddaad su'aalo ah qabto.

Gedeon Richter

## JADWALKA YAR EE DHIIGGA CAADADA

drovelis

3 mg drospirenon iyo 14,2 mg estetrol (sida estetrol monohaydarayt)
Kiniini kahortag uuraysi oo iskudhafan oo leh nidaam daawayn 24/4

Waxaan kugu boorrinaynaa inaad xilliyada dhiigga caadada ku qorto jadwalka oo aad dabadeed jadwalka hore ugu soo qaaddo kulanka ummulisadaada ama takhtarkaaga dumar.

JADWALKA DHIIGGA CAADADA

| Bil | 1 | 2 | 3 | 4 | 5 | 6 | 7 | 8 | 9 | 10 | 11 | 12 | 13 | 14 | 15 | 16 | 17 | 18 | 19 | 20 | 21 | 22 | 23 | 24 | 25 | 26 | 27 | 28 | 29 | 30 | 31 |
|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|
| | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | |
| | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | |
| | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | |
| | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | |
| | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | |
| | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | | |

Sidan samee: Qor bisha iyo maalinta aad bilowday qaadashada Drovelis®.
**S** ku calaamadi maalmaha aad u baahato suufka caadada.
**X** ku calaamadi markaad uun u baahato xalleef aad nigiska dhibcaha dhiigga kaga ilaaliso.

**XUSUUSQOR**